



**Daqiiqadaha shirka Billaha ah ee isku duwidda kaalmada sharciga,  
Muqdisho, 23<sup>ka</sup> Nofember 2015**

**Goobta:** W. Cadaaladda, Muqdisho **Tr:** 23<sup>ka</sup> Nofember, **Bilawday:** 09:30am  
**Xiriiriye:** Salad Addow (Isku duwaha kaalmada & Wacyigelinta Sharciga)

**Participants:**

S/No	Name	Position	Institution
1.	Muse Macalin Maxamed	Prosecutor	Attorney General Office
2.	Samira Hussein Daud	Prosecutor	Attorney General Office
3.	Mohamed Sh. Hassan Ahmed	Legal advisor	MOJ
4.	Abdirisq Sh. Mohamed	BOD Member	SOWDEN
5.	Mohammud Mohamed Abdi	Lawyer	SSWC
6.	Caisha Malaq Mahdi	Director	Burfule Women development
7.	Ubah Mohamed Nur	Legal advisor	Galmudug State
8.	Abdullahi Moalim Muhidin	Lawyer	Somali Bar Association
9.	Abdulqani Abdullahi	Lawyer	Somali Bar Association
10.	Khalif W. Mohamed	,,,,,,	Custodial Corps
11.	Ibrahim Mohamed Cise	Deputy director of Cenral prison	Custodial Corps
12.	Hibo Adan Osman	Public relations	Ifrah Foundation
13.	Sumayyah Ahmed Ali	Executive Director	Ifrah Foundation
14.	Abdikadir Sh. Abdi	Protection coordinator	Hopline
15.	Rukia Sharif Ibrahim	Member	MOJ
16.	Rahma Hassan Abdullahi	Member	MOJ
17.	Ruqiyo Ali Abdulle	Deputy Director	SOWDEN
18.	Halima Mohamed Moalim	Lawyer	SWDC
19.	Noor Ali Farah	Secretary	TAB SOOMAALIYA
20.	A.fitah Ahmed Omar	Admin and finance director	MOJ Jubaland

## Doodda/ Faaloyinka Shirka

<b>Ujeedooyinka Shirka</b>	<p><b>Ujeedooyinka Muhiimka ah:</b> kulankaan billaha ah waxaa ujeedadiisu tahay in la iskula wadaago xogaha, laguna falanqeeyo iyo in lagu soo bandhigo talooyinka lagu kobcinkaro howlaha Bixinta Kaalmada Sharciga iyo Wacyigalinya, sida: - in laqoro shuruucdii lagu howl-gali lahaa, lana dajiyo siyaasad lagu hagaajinayo hanaanka bixinta kaalmada sharciga iyo in dib-u-eegis lagu sameeyo tayada adeega bixinta kaalamada sharciga.</p> <p><b>Si'gaar ah- kulankaan waxaa laga filayaa:-</b></p> <ol style="list-style-type: none"><li>1. In la isku xiro hay'adaha ka shaqeeya bixinta kaalmada sharciyadeed iyo kuwa saameynta ku leh, si ay u wadaagaan waaya aragnimadooda, ayadoo lagu dhiiri galinayo dhamaantood inay wada samaystaan hal-hadaf (<b>Vision</b>) ee bixinta kaalamada sharciga mustaqbalka.</li><li>2. In la abuurto hanaan ku haboon bixinta kaalmada sharciga si loo baahiyo cadaalada.</li><li>3. In bixiyaasha kaalmada sharciga iyo kuwa saamaynta ku leh ay u dhiiranaadaan hurumarinta adeegyadaan.</li><li>4. In lawadaago lana falanqeeyo caqabadaha jira iyo siyaabaha loo xalinkaro.</li></ol>
<b>AJANDAHA</b>	<p><b>Hanaanka Kulanka &amp; Ajandaha</b></p> <ol style="list-style-type: none"><li>1. Hordhac iyo Isbarasho: <b>(5-Daqiiqo)</b></li><li>2. Kasoo qeybgal khaaska ah <b>(Xoghayaha Joogtada ah): (5 Daqiiqo)</b></li><li>3. Dib u-eegis iyo Xoojin waxyaabihii kasoo baxay shirkii ugu danbeeyey ee isku xirka ahaa iyo qaabkii loola soconlahaa dhqangalka waxyaabihii kasoo baxay <b>(10- Daqiiqo).</b></li><li>4. Dhagaysiga Dhagaysiga warbixinadda- Bixiyaasha kaalmada Sharciga, soo koobitaanka waxyaabihi ay qabteen ee laxiriiray Bixinta Kaalma sharci ee Bishii ugu danbeysay, <b>(35-Daqiiqo).</b></li><li>5. Dood/Falanqeyn: Baahida jirta ee Bixinta kaalmada sharciga ah &amp; sida waqtigaan looga jawaabi karo: <b>(15-Daqiiqo).</b></li><li>6. Dood/falanqeyn: soo gudbin hadii ay jiraan caqabada kale oo saamaynaya dhamaan hay'adaha? Samaynta qorsha-howleed loo dhanyahay: <b>(10-daqiiqo).</b></li><li>7. Khudbo ay Jeedinayaan SSWC oo ah (Sida ay ubixiyaan kaalmada sharciga, Sababaha kadanbeeya bixinta kaalmada sharciga iyo cida ay siiyaan adeega kaalmada sharciga, <b>(10- Daqiiqo).</b></li><li>8. Khudbo ay Jeedinayaan Xubno kasocda Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Qaranka oo kahadlaysa habka ugu wanaagsan ee wadashaqeyn loo</li></ol>

	<p>samaynkaro iyo talooyin guud, <b>(10- Daqiiqo).</b></p> <p><b>9. Waxkasta ee loo arko inay muhiim tahay (WM): (5-Daqiiqo).</b></p>
<b>Mawduuc</b>	<b>Dood</b>
<p><b>AJANDAHA 1aad</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>Hordhac &amp; Is barasho</b></li> <li>• <b>Kasoo qeyb-galayaasha gaar ka ah: Xog-Hayaha Joogtada ah</b></li> </ul>	<p>Xoghayaha Rasmiga ah ee Wasaaradda Cadaaladda &amp; Arimaha Garsoorka <b>Dr. Ismaaciil Jimcale</b> ayaa soo dhaweeyey dhamaan xubnaha kaqeyb galayey shirka, wuxuuna si rasmi ah u daahfuray shirka wada-tashiga iyo iskuxirka hay'adaha kashaqeyey bixinta kaalamda sharciga iyo Wasaaradda u ahaa kii 2-aad oo nuuciisa ah oo lagu qabto hoolka Wasaarada. Xoghayuhu wuxuu u mahadceliyey uuna qiray ahmiyada uu leeyahay shirka iyo baahida loo qabo in la-isku xiro ayna dhexmarto wada shaqeyn hay'adaha Dowlada iyo Ururada aan dowliga ahayn ee kashaqeynta bixinta kaalma dhanka sharciga si loo gaarsiiyo adeeg wanaagsan dhamaan muwaadiniinta Soomaaliyeed. Sidoo kale wuxuu sheegay in doorka Wasaaradda uu ahaa mid aad u tabar-daran 20-ki sano ee lasoo dhaafay ee wadanku kujiray dagaalka sokeeye iyo isku dhaca, Xoghayuhu wuxuu amaanay doorka Hay'adaha aan dowliga ahayn, sida ay u buuxiyeen kaalintii dowladnimo iyo adeegyadii ay u hayeen muwaadiniinta Soomaaliyeed. Asagoo hadalkiisa sii watay, Dr Ismaaciil wuxuu diirada saaray qodobada hoose:-</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>➤ dadaalka dowladda ay ugu jirto in ay ciyaarto kaalinteedda waxaana waajib ah in dadka ay u sinnaadan sharciga , sidoo kale dadka saboolka ah iyo kuwa laga turrada badan yahay in ay hellaan kaalmo sharci ah.</li> <li>➤ Dowlada soomaaliya waxay awood u leedahay in ay dhisto hay-addo garsoor madax banaan oo awood u leh wax ka qabashadda baahiyaha garsoor ee muwaadiniinta soomaaliyeed si caddaalada loo gaarsiiyo dadka oo dhan</li> <li>➤ si loo gaaro hadafyadaas wasaaradda caddaaladda iyo dhamaan dhinacyadda ay khuseyso oo ay ku jiraan NGOs ka bixiya kaalmadda sharciga iyo hay-adaha kale ee bulshadda rayidka iyadoo la abuurayo iskaashi gaar ah si loo wadaago macluumaadka iyo sidii loo hormarin laha qorshaha qaran ee kaalmadda sharciiyeed.</li> <li>➤ sidoo kale xoghayaha wuxuu bogaadiyay kaalinta NGOs ay ka qaateen caawinta muwaadiniinta soomaaliyeed ,xoghayaha wuxuu carabka ku adkeeyay in NGOs aysan isku dayin in ay qaataan kaalinta iyo mas'uuliyadda dowladda ,NGOs waa in ay la shaqeeyaan dowladda soomaaliya si ay u gudato howlaheeda waajibaadkeeda ,iskaashigaas wuxuu si fiican ugu adeegi doona soomaaliya.</li> <li>➤ Dhanka kale ,wasaaradda cadaaladda waxay fududaynaysaa dajinta siyaasadda iyo qorshaha isku dubaridka barnaamijyadda si loo hormariyo istiraatiijadda qaranka ee gargaarka sharciga si</li> </ul>

	<p>mudnaanta loo siiyo ku dhaqanka sharcigga, kulamadda xiriirka ah waxa wadatshi lagala yeelanayaa NGOs iyada oo la dhageysanayo soo jeedintooda iyo faalooyinkooda si looga gudbo caqabadaha ku gudban shaqooyinka ay qabtaan.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>➤ Ujeedka laga leeyahay kaalmadda waa in ay noqotaa taageeridda dadka nuqul si ay u helaan xuquuqda sharciga ,waana fursadda kaliya ee lagu xoojin karo hanaanka cadaaladda ee dalka.</li> <li>➤ Xog-hayaha guud ayaa ku dhiira geliyay xubnaha in la abuurro xiriir iyo wada shaqeyn bad qabta ee u dhaxeysa wasaaradda caddaaladda iyo bixiyayaasha kaalmadda sharciga.</li> <li>➤ Ugu danbeytii xoghayaha guud wuxuu ammaanay kana mahad celiyay in shirka isku xirka bixiyayaasha kaalmadda sharciga lagu qabto xarunta wasaaradda caddaaladda ,”waxaan aad ugu faraxsanahay in aan ka soo qeyb galo shirka isku xirka bixiyayaasha kaalmadda sharci ee soomaaliya ,waxayna tuseysaa in uu jiro kala duwannaansho weyn oo u dhaxeeyso soomaaliya iyo wadamadda dunidda seddexaad maadaama halkaan ugu hadlayno dhaqan gelinta kaalmo sharci ,waxaa mahad gaar ah u jeedinayaa hay’adaha maxaliga ah iyo kuwa caalami ah ee wada shaqeynta inaga dhaxeeyso si loo hormariyo hay’adaha caddaaladda.</li> <li>➤ Inta ka dib wuxuu ku soo dhaweyay xiriiriyaha si uu usii amba qaado qodobadda kasoo haray shirka, Isku duwaha Kaalmada iyo Wacyi gelinta sharciga.</li> </ul>
--	--

***Xiriiriyaha shirka wuxuu ka codsaday qof kasta Inuu isbaro kasoo qeyb-galayaasha.***

<p><b>AJANDAHA 2aad</b>  <b>Dib u-eegis iyo Xoojin waxyaabihii kasoo baxay shirkii ugu danbeeyey ee isku xirka ahaa iyo qaabkii loola soconlahaa dhqangalka waxyaabihii kasoo baxay (Xiriiriyaha)</b></p>	<p>Xiriiriyaha gaargaarka iyo wacyi gelinta sharciga wuxa u qiray in ka qaybgalayaasha imaanshohooda kulanka uu aad u muhiim yahay. Xiriiriyaha ayaa mar kale shaaca ka qaaday in muhiimada guud iyo ujeedooyinka gaar ka ah ee shirkan ay tahay in la wadaago xogta iyo in laga dodo dhamaan caqabadiha jira. Isaga oo hadalkiisa sii wata, gudoomiyuhu waxa uu ogaysiiyey ka soo qaybgalayaasha, wixii ka baxsan ajandaha in ay bil kasta jiri doonto labo soo jeedin (presentation); Mid waxay muhiim u tahay hay’adaha garsoorka tan labaadna hay’adaha aan dawliga ahayn. Kulankan waxaa soo jeedin doonaa SSWC, iyo Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Qaranka Soomaaliyeed. Xiriiriyaha Isagoo hadalkiisa siiwata ayu dib u eegay soona khulaaseeyey waxi looga hadlay shirki 15-Oktober 2015 laguna qabtay Wasarada Caddaalada:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>❖ Xiriiriyaha aya dib u eegay akhriyeyna qodobadi ugu muhiimsanaa ee shirkii la soo dhaafay, sida caqabadihii, waxyaalihii la soo jeediyey, tacliqyadii iyo meelihii ay calaamadiyeen ka soo qayb galayaasha shirka.</li> </ul>
---	--

	<ul style="list-style-type: none"> <li>❖ xiriiriyaha ayaa shaaca ka qaaday in siyaasada lagu hagi lahaa gargaarka sharciiyeed in lagu soo bandhigi doono kulan wadatashi ah bisha December 2015 si loo maamulo loona wnaajiyo tayada adeega gargaarka sharciga Soomaliya. Xiriiriyaha wuxuu carabka ku adkeeyey muhiimada ay leyihiin NGOs ka si loo hormariyo siyaasaddan, waxaana si rasmi ah loogu casuumi doona shirka waadashiga qaran.</li> <li>❖ Ugu danbaynti xiriiriyuhu waxa uu u mahad celiyey ka soo qayb galayaashii wuxuuna u furay Dood wadaag lagaga hadlayo inta dhiman ee qorshaha shirka.</li> </ul>
--	---

### Dood!

<p><b>AJANDAHA 3aad</b></p> <p><b>Warbixinadda- Bixiyaasha kaalmada Sharciga</b></p>	<p>Dhamaan ka qayb galayaasha waxay si cad u qireen doorka wax ku oolka ah ee ay wasaarada caddaalada ku leedahay si ay u samayso siyaasad ay ku horumarinayso tayada adeega gaargaarka sharciga. iyada oo ay doodii socoto ayaa NGOs kasta waxa la siiyey fursad ay kaga hadlaan wax qabadkoodii ku aadanaa bishii la soo dhaafay:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>❖ Xarunta Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (SWDC) waxay sheegtay in ay sameeyaan gaar gaarka sharciga dhamaan dadka rayadka ah oo ay ay ku jiraan keesan GBV bishii la soo dhaafay. SWDC waxay ku andacodeen inay bixiyeen gaar gaar sharciga 54 xaaladood oo qaybo kala duwan ah( Qoyska, GBV, fal danbiyeedyo) inta ka faa,iidaysatay ayaa waxay ahaayeen dadka nugul.</li> <li>❖ Ururka Qareenada Soomaaliyeed (SBA): waxay leeyihiin waaxda gaar gaarka sharciga si ay u bixiyaan dhaamaan keesaska madaniga ah iyo kuwa ciqaabta. SBA waxaa ay leedahay baaxaad aad u weyn oo ay ku bixiyaan kaalmada sharciga. Ururku wuxuu bixiyaa adeeg gar gaar sharci ee aan xuduud lahayn wuxuuna u qabtaa dadka nugul. Hase ahaate waxay sheegeen in ay anay hayn tirada dhabta ah ay bixiyeen dhamaan qareenada ka diiwaan gashan ururkooda. Si kastaba ha ahaatee, Abdalla, qareen SBA kulankan uga qaybgalay waxa uu siiyey adeegga gargaarka sharciiyeed 2-kiis bishii la soo dhaafay.</li> <li>❖ Shabakadda Isku xirka Horumarinta Haweenka Soomaaliyeed (SOWDEN): Waxay diirada saareen gargaarka sharciga oo keliya gaar ahaan keesaska GBV. Sida ay sheegeen waxay ka shaqeeyaan ka hortagga dhaqamada GBV. Si kastaba ha ahaatee, SOWDEN ma sheegin wax kiisas ah oo ay caawiyeen bishii la</li> </ul>
--	---

	<p>soo dhaafay.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>❖ Badbaadinta Haweenka iyo Caruurta Soomaaliyeed (SSWC): waxay bixisaa kaalmo sharci oo ay diiradda si gaar ah ugu saarto dadka nugul, iyo dadka gudaha ku barokacay. Bishii la soo dhaafay, SSWC waxa ay caawiyeen 16-20 xaaladood oo yar yar oo la xiriira khilaafka qoyska, iyo keesas kale oo aalaba ka dhaca Xeryaha Dadka Gudaha Ku Barakacay. Intaa waxaa dheer, SSWC waxay bixisay wacyigi gelinta sharciga ah, iyo dib u heshiisiinta bulshada ee Dadka Gudaha Ku Barakacay.</li> <li>❖ Somali Hopline for Civil Society forum:- - Waa urur aan faa'iido doon ahayn, taageeraya Hay'adah Horumarinta, Ilaalinta xadgudubyada xuquuqda aadanaha, iyo kor u qaadida wacyi gelinta Hay'adaha booliska ee gobolka Shabeellaha Hoose ee Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, Hopeline ma sheegin xaalado ay ilaa iyo haatan ay taageerto, sida ay sheegtay in aysan ka jirin boolis, garsoor iyo hay'ado ka shaqeeya gobolka Shabeellaha Hoose. Si kastaba ha ahaatee sheegashaadaa waxaa ka soo hor jeestay Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud intii lagu dhex jiray kulanka, oo waxaa bixiyey gargaarka sharciga kor ku xusan,</li> </ul> <p>Ugu danbayntin waxaa kale oo jira NGOs kale oo ka qaybgalay shirka, hase ahaatee ma aysan soo bandhigin wix kiis ah oo ay difaaceen bishii la soo dhaafay.</p>
<p><b>AJANDAHA 4 aad:</b> Baahida jirta ee Bixinta kaalmada sharciga ah &amp; sida looga jawaabi karo.</p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>➤ Dhamaan ururada kasoo qeyb galay shirka waxa ay isku raaceen in ay jirto baahi loo qabo adeeg kaalmo sharci, hase ahaate waxa jirto caqabado maaliyadeed si wax looga qabto baahiyahaasi.</li> <li>➤ Waxaa loo soo jeediyey iney si bilaash ah ku shaqeeyaan halkii ay markasta ku xirnaa lahaayeen iney helaan deeqo caalami ah.</li> </ul>
<p><b>AJANDAHA 5 aad:</b> Dood: caqabadaha saamaynaya dhamaan</p>	<p>Waxaa la isku afgartay dhamaan caqabadihii la soo bandhigey kulankiihore in ay wali xal rasmi ah laga gaarin. Si kastaba ha ahaatee, waxaa la isku raacey in caqabado badan ay xalismi doonaan markii la dhamaytiro siyaasadda qaran ee bixinta kaalmada sharci.</p> <p>Caqabadaha cusub ee bishaan lasoo sheegay waxaa kamid ah:</p>

	<ul style="list-style-type: none"> <li>✚ Xubin ka socotay Galmudug waxay soo bandhigtay in ay jirto baahi wayn oo loo qabo xarumo bixiya adeeg kaalmo sharci, iyo in sare loo qaado tayada hayadaha garsoorka. Inta badan kiisiska ugu culus ee ka dhaca gobolka waxaa loo soo wareejiyaa isbitaalada iyo maxkamadaha Gobolka Banaadir si loogu helo xal rasmi ah.</li> <li>✚ In badan oo kamid ah bulshada waxa ay aaminsanyihiin in caddaaladdu ay ku jirto in kiisaska lagu xaliyo hanaankii hore ee odeyaal dhaqameedka halkii si toos ah loo abaari lahaa hayadaha rasmiga ee caddaaladda. In badana oo bulshada katirsan ma oga hay'adaha sharciga iyo qaab-dhismeedkoodaba. Sidaa darteed, waxaa la soo jeediyey in la baro dadka waajibaadka iyo xuquuqaha sharci ee ay leeyihiin, ee la xiriira hayadaha rasmiga ee caddaaladda.</li> <li>✚ Halka qaar kalana ay doonayeen in ay maraan wadooyin aan sharci ahayn , maxaa yeelay cabsi jirta awgeed waxay doorbidaan ineey qariyaan ayna ka aamusaan caddaalad darada lagu sameeyey.</li> </ul>
<p><b>AGENDA 6aad</b>  <b>Soo jeedin,</b> SSWC sida ay howlaha gargaarka sharciga ah u qabtaan.</p>	<p>SSWC: waa urur haween, aan dowli ahayn, kana shaqeeya samafalka lana aasaasey 1992 magaalada Muqdisho. waxaana aasaasey tiro aqoonyahano haween Soomaali ah ee isugu jira bulshada qaybaheeda kale duwan.</p> <p><b>Istiraatiijiyadda SSWC</b></p> <p>Sare u qaadida aqoonta, kobcinta wacyi gelinta, u doodida iyo u taagnaanshaha, kulamada iyo shirarka, wacyigalinta, isku-xirka, Xeer qoridda, cilmi barista iyo horumarinta meediyada, iyo keydinta dukumintiyada.</p> <p><b>Meelaha ay diiradda saaraan</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>➤ Sare u qaadida wacyiga iyo kobcinta dhaqaalaha guud ahaan , gaar ahaan Banadir, Baay iyo Shabeelada Hoose, Galgadud.</li> <li>➤ Sare u qaadidda wacyiga bulshada ee la xiriira kufsiga iyo xad-gudubyada ku salaysan jinsiga.</li> <li>➤ Bixinta adeegyo ka jawaabaya xad-gudubka jinsiga iyo qaababka loogu hortagi karo.</li> </ul>

	<ul style="list-style-type: none"> <li>➤ Sare u qaadidda difaaca haweenka soomaaliyeed iyo tayo siinta la xiriirta tababar xirfadeed, sare u qaadiida wacyiga.</li> <li>➤ Xoojinta doorka ururada haweenka ee Banadir, Galgaduud, Bay, Hiiraan, Shabeelooyinka.</li> </ul> <p><b>Muhimadd ay leedahay Kaalmada Sharci</b></p> <p>SSWC mas'uuliyaddeda ugu weyn waa ka hortaga xadgudubyada haweenka iyo caruurta ee loga soo horjeedo xadgudubka jinsiga iyo guud ahaan dhibaatooyinka. Sidaa awgeed si sare loogu qaado cadaalad helida dhibanayaasha loo gaystay xadgudubyada jinsiyadeed, SSWC waxay bixisaa adeegyo kaalmo sharci oo lagama maarmaan u ah dadka nugul oo aan isku filnayn si ay u helaan cadaalad ku aadan adeeg sharci oo rasmi ah.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>✓ SSWC waxay si gaar ah u daneeyaan xakameynta xadgudubyada laxariira Jinsiga, sida:- kufsigu, kuxadgudubka hantida dadka, dhaawicida jirka iyo kufsigu nuucyadiisa kala duwan.</li> <li>✓ Bishii lasoo dhaafay, SSWC waxay caawisay 16-20 kiis, mararka qaarna tirida dhibanayaasha waa sii kordhaa, kuwaas oo doonaya inay helaan waxqabad sharci oo lidi ku ah danbiyada.</li> </ul>
<p><b>AJANDAHA7aad</b>  <b>Soo jeedin Xafiiska</b>  <b>Xeer ilaaliyaha Guud</b></p>	<p>Xubnaha ka socday xafiiska xeer-ilaaliyaha guud- waxay si cad u qeexeen nidaamka sharci ee bixinta kaalmada sharciga iyo habka ugu wanaagsan ee loo hurumari karo adkeynta xariir wada shaqeyneed ee hay'adaha Cadaalada iyo ururada maxaliga ah si loo taageero dadka taagta daran kuwaas oo ubaahan caawinaad sharci. Sidoo kale, XXG waxay fasiraan hababka iyo qaababka loo kormeero xabsiyada. Qareen ku wuxuu raaci karaa marxalad kasta ee uu marayo kiiska uu wakiilka kayahay. Khudba kooban kadib, xubnaha kaqeyb-galaayaashu waxay su'aalo weeydiyeen XXG, waxaana ka mid ahaa:-</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>➤ Hadii NGO ama dad shaqsiyaad ah ay doonayaan inay booqdaan xabsiga ayna warqad ogolaansho ka qaataan Agaasimaha Guud ee wasaarada Cadaalada, Ma sax baa? Maxase ku qaldan?</li> <li>➤ Mararka qaar waxaa jira isku dhac u dhaxeeya xafiisyada hay'adaha dowlada. Tusaale- XXG waxu u ogalaan kara NGO in u booqan karo xabsi ama saldhigyada booliiska, sikastaba ha ahaatee, madaxda xabsiyada iyo saldhigyada uma hoggaanada kasareeyaa aya laga yaabaa ineey mararka qaar diidan</li> </ul>



	<p>warqadaasi. Maxaa xal ah?</p> <p>Su'aalahasi iyo kuwo kale oo lamid ah aya laga doodday, halka xubnaha kasocday XXG ay ka bixiyen jawaabo waafi ah oo lagu qanci karo.</p>
<b>Gunaanad</b>	<p>Dhamaan Taalooyinka &amp; Caqabadaha ay soo jeediyeen Ururada bixiyaasha kaalmada sharciga waxaa loo qaatay si dhab ah, waxaana lasiiyey kaalinta ugu muhiimsan ee qorshooyinka soo socda. Mahadcelin kadib waxaa kulan soo xiray Agaasinka Shirka ahna Isku-duwaha kaalmada &amp; wacyigalinta Sharciga, asagoo ogaysiiyey Hay'adaha in laqaban doono Shir nuucaan oo kale ah Bissha soo socota ee Diseember 2015.</p>
<b>Dhamadka Kulanka</b>	<b>12:30 PM</b>